



San Diego Unified School District

EUGENE BRUCKER EDUCATION CENTER
4100 Normal Street, San Diego, CA 92103-2682

(619) 725-5506

Carl A. Cohn
Madaxa Waxbarashadda Dugsiyada

Juunyo 2007

Mudane Waalidiin ama Dadka ardeyda masuulka ka ah,

Waxaa inagu soo fool leh gabagabbeynta sannad-dugsiyeedkan oo guul ku dhammaadey. Waxaan si aad iyo aad ah idiin ka mahad celineynaa taageerada waxbarasho ee aad ilmihinna guriga ku siiseen iyo inay sharaf weyn noo tahay inaan adeeg waxbarasho carruurtiinna iyo qoysaskaba u fidino. Waxaa aad inoo dhiiri gelineya horumarka aan sida wadajirka ah u sameynay.

Waad mahadsan tihiin, San Diego Unified School District waxay soo yareysay faraqii xaga buundooyinka ahaa ee ardeyda u dhexeeyey, waxaa kale oo la gaadhay ama laga sare marey yoolalkii dalka Maraykanka u dejisnaa ee Horumar Sannadeedka ku Filan nee loo baahnaa (AYP), waxaa ardey badan laga caawiyey inay noqdaan kuwo afka Ingiriisiga si faseex ah ugu hadla, waxaa laga sare marey natiijooyinkii dawlad-goboleedka ee looga baahnaa Imtixaanka looga Qalin jebineyo Dugsiyada Sare ee California (CAHSEE), iyo waxaa kale oo kor u kacday buundooyinkii Tasmada Habsami-U-Socodka Waxbarashadda (API) ee dugsiyadeenna intooda badan. Guud ahaan waxabarashada degmada, dhammaan kooxaha ardeydu waxay gaadheen guulo waxbarasho oo wanaagsan, iyo 12 ama in ka badan oo dugsiyadeenna ah oo heli jirey miisaaniyada Title I loo yeqaano waxaa lagu sharfay inay noqdeen kuwo heer sare ah oo nodey tusaale lagu dayan karo. Ardey badan oo dugsiyadeenna ka mid ah ayaa ku dhiiraneya inay qaataan koorsooyinka Meeleynta Sare ee dugsiyada sare. Waxaad kale oo aad ku faraxdeen in 14 dugsiyadeenna sare ka mid ah uu wargeyska caanka ah ee la yidhaahdo Newsweek Magazine uu sannadkan 2007 u aqoonsadey inay ka mid yihiin dugsiyada Maraykanka ugu wanaagsan. Guulahaas aan gaadhay waa inaan halkaas ka sii wadnaa.

Toddoba dugsi oo hoose ayaa Guddiga Waxabarashadda Degmadu beri dhawayd u ansaxiyeen inay noqdaan kuwo leh laga bilaabo fasalka xanaanada ilaa iyo siddeedaad. Barnaamij Cusub oo Af Carabiga lagu baranayo ayaa Dugsiga Hoose ee Carver laga dhigaa. Saddex dugsi oo Magnet ah oo cusub ayaa xilliga dayrta la fureyaa kuwaas oo kala ah: Barnard Elementary Mandarin Chinese Language Program, Birney Elementary Academy of International Studies and Florence Griffith Joyner Elementary Micro Society Magnet School. Si aad isaga diiwaan gelisid, waxaad wacdaa (619) 725-5672 ama waxaad gashaa shabakada Internetka ee www.sandi.net adiga oo gujineya meesha ay ku taalo enrollment options oo ka dhigan Isdiiwaangelinta Ikhtiyaariyada ah.

Waxaan kale oo aan ku faraxsanahay in xilliga dayrtan ay furmi doonaan Dugsiga Sare ee Lincoln iyo afar dugsi oo kale oo ah dugsiyada lagu dhigeyo farshaxanada heerarka dawlad-goboleedka u dejisan. Kuwaas waxaa ka mid ah Luther Burbank, Florence Griffith Joyner iyo Laura G. Rodriguez elementary schools iyo Thurgood Marshall Middle School. Dhisamaha dugsiyadaas cusub iyo casriyeynta dugsiyadii horey u jirey waxaa suurtoagal ka dhigay sida wanaagsan ee loo isticmaaley lacagtii Qorshaha MM loo yeqaano ee dugsiyada, kuwaas oo beri dhawayd hoose loo dhimay lacagtii dulsaarka ahayd ee loo yareeyo isticmaalka malaayiinta doolar ee canshuur-bixiyaasha.

Waalidiinta, macallimiinta, maamuleyaasha iyo shaqaalaha kale ee kalkaaliyaasha ahba waad ku mahadsan tihiin dadaalkii aad muujiseen. Waxaa haynaa jidkii aan ku noqon lahayn waxbarashadda degmada ee magaaloyinka waa weyn mida ugu wanaagsan. Fasax wanaagsan!

Si daacadnimo ah,

Carl A. Cohn
Madaxa Waxbarashadda Dugsiyada

Xusuusnow. Waxaa ardeyda cusub loo fureyaa si ay isu diiwaan geliyaan bisha Luuliyo 23-Agoosto 24, 2007, duhurkii ilaa iyo 7 fiidnimo., Roosevelt Middle School, 3366 Park Blvd. Fadlan iska diiwaan geli.

Somali version:06.June07